

UW Medicine

Xeerka Kaalmada Dhaqaale – Guudmarka Luuqadda Cad ku Qoran

Kaalmo Dhaqaale Ee La Bixiyaya: UW Medicine waxay siisaa kaalmo dhaqaale, oo hoos timaada Siyaasadeeda Kaalmada Dhaqaalaha, bukaanka u qalma ee aan awoodin inay iska bixiyaan daryeelka caafimaad ee degdega ah ama daryeelka kale. UW Medicine waxay siisaa kaalmo dhaqaale wixii bukaan/damiin dakhligiisa qoysku yahay ilaa 400% Heerka Saboolnimada Federalka (Federal Poverty Level, FPL) loo habeeyay cabirka qoyska kadib markii caymiska kale ay ka qiil waayeen. Adeegyada xarunta iyo/ama xirfadalah Airlift Northwest, Harborview Medical Center, UW Medical Center, UW Physicians, UW Medicine Primary Care, iyo Valley Medical Center:

- 0% - 300% FPL-ka qiimo dhimis kaalmo dhaqaale oo ah 100%

Adeegyada xarunta kaliya leh taariikhaha qiimo dhimista Julaay 1, 2022 ama wixii ka danbeeya, ee Harborview Medical Center, UW Medical Center, iyo Valley Medical Center:

- 301% - 350% FPL-ka qiimo dhimis kaalmo dhaqaale oo ah 75%
- 351% - 400% FPL-ka qiimo dhimis kaalmo dhaqaale oo ah 50%

Valley Medical Center, shakhsiyadka u qalma kaalmada dhaqaale lagama qaado xadi ka badan inta caadiyan lagu soo dalayo xaalada degdega ah ama daryeelka daruuriga ah ee caafimaad.

Shuruudaha U Qalanka iyo Kaalmada La Bixiyo: U qalanka kaalmada dhaqaale waxay ku salaysan yahay xaalado badan oo ay ku jiraan nooca xaalada iyo daryeelka loo baahan yahay, caymiska uu qofku leeyahay ama ilo kale oo lacag uu iskaga bixiyo ah, dhakhliga, cabirka qoyska, hantida, deganaanshaha gobolka WA iyo xaalado gaar ah oo la eego oo bukaanka ah ama bixiyaha ay u badan yahay inuu eego.

Bukaanka doonaya kaalmo dhaqaale waa inay u hogaansamaan nidaamka arjiga Kaalmada Dhaqaale. Waxaa taas kamid ah gudbinta bayaanka W-2 ee bukaanka, waraaqaha mushaharka wakhtigan, bayaanada bangiga ama cashuur celinta dakhliga sanadkii lasoo dhaafay, **iy**o buuxinta nidaamka arjiga ee dhamaan ilaha kaalmo, oo ay ku jiraan kaabista daryeelka (Medicaid).

Sida loo Dalbado Kaalmada iyo: Bukaanka ama qof kasta oo ku jira daryeelka bukaanka, oo ay ku jiraan xubinta qoyska ama bixiyaha, waxay sheegi karaan walaacyada dhaqaale. Bukaanka ama cida ka masuulka ah kadibna waxaa lagu dhiiri gelinayaa inay buuxiyaan arjiga kaalmad dhaqaale. Si aad ugu qalanto kaalmada dhaqaale, arjiga waxaa lasoo gudbin karaa wakhti kasta kahor si uu u helo xaakinka maxkamadu.

Waa maxay U Qalanka Kaalmadu: Kaalmada dhaqaale waxay ku kooban tahay daryeelka caafimaadka uu ku bixiyay goobta UW Medicine xirfadle caafimaad oo UW. Kharashka sida socdaalka, cuntada, hurdada, iyo agabka caafimaadka kuma jiraan siyaasada Kaalmada Dhaqaale. Dawooyinka la qoro waxaa la bixin karaa ilaa 300% FPL ah 100% qiimo dhimis kaalmada dhaqaale hadii uu qoro bixiyaha UW Medicine oo laga qaato farmasiga UW Medicine (hadii la heli karo).

Halka Laga Heleyo Nuqulo, Waraaqaha La Gudbinayo iyo Macluumaadka Xidhiidhka: Siyaasada Kaalmada Dhaqaale ee UW Medicine, Arjiga Kaalmada Dhaqaale, Guudmarka Luuqad Cad, iyo Siyaasadaha Kharash Dalicida & Uruurinta waxaa lagu heleyaa bilaash. Waraaqahan waxaa lagaga heli karaa onleyn ahaan luuqado badan, taleefanka ama iyada oo la imanayo. Waraaquhu waxay ku jiraan onleyn ahaan si loo soo dejisto ama loo daabacdo uwmedicine.org/financialassistance ama valleymed.org/financialassistance. Waxa aad dalban kartaa nuqulkaaga adiga oo imanaya ama taleefanka kala soo hadlaya goobta aad daryeelka ka doonayso.

Arjiga Kaalmada Dhaqaale iyo waraaqaha xoojinta oo Ingiriisi ah, waxa aad iminka ka heleysaa MyChart (marka laga tago Airlift Northwest) si aad ugu gudbiso waraaqaha iyada oo ku xidhan goobta daryeelkaaga. Dhamaan arjiyada kale ee la gudbiyay waxaa lagu soo gudbinayaa boosta, faakis, ama foolka-fool. Wixii macluumaad ah ee la gudbiyay si loo eego waxaa loola dhaqmi doonaa macluumaadka caafimaadka la ilaaliyay sida uu dhigayo Sharciga La Xisaabtanka iyo Qaadashada Caymiska Caafimaadka (Health Insurance Portability and Accountability Act, HIPAA).

<p>Harborview Medical Center UW Physicians UW Medicine Primary Care Financial Counseling 325 9th Ave; Mail Stop 359758 Seattle, WA 98104-2499 Taleefan 206.744.3084 FAAKIS 206.744.5187 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 4:30 galabnimo mychart.uwmedicine.org</p>	<p>UW Medical Center-Montlake UW Physicians UW Medicine Primary Care Financial Counseling 1959 NE Pacific Street; Mail Stop 356142 Seattle, WA 98195-6142 Taleefan 206.744.3084 FAAKIS 206.598.1122 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 4:30 galabnimo mychart.uwmedicine.org</p>	<p>UW Medical Center-Northwest UW Physicians UW Medicine Primary Care Financial Counseling 1550 N 115th St Seattle, WA 98133-9733 Taleefan 206.744.3084 FAAKIS 206.598.1122 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 4:30 galabnimo mychart.uwmedicine.org</p>
<p>Valley Medical Center Patient Financial Services P.O. Box 59148 Renton, WA 98058-2148 Taleefan 425.690.3578 FAAKIS 425.690.9578 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 5:00 galabnimo mychart.valleymed.org/#mychart</p>	<p>Valley Medical Center Patient Financial Services 3600 Lind Ave SW, Suite 110 Renton, WA 98057-4970 Taleefan 425.690.3578 FAAKIS 425.690.9578 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 5:00 galabnimo mychart.valleymed.org/#mychart</p>	<p>Airlift Northwest Patient Financial Services 6505 Perimeter Road S., Ste 200 Seattle, WA 98108 Taleefan 206.598.2912 FAAKIS 206.521.1612 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 5:00 galabnimo</p>